



Dayactirka RHS, Wargayska Madaxa Mashruuca #3

Nov. 13, 2013

Habeenkii la soo dhaafay, gudiga Dugsiyada Guud ee Portland waxa ay dhagaysteen talo soo jeedintii howl-wadeenada ee kordhinta bedka dib ucusboonaysiinta Dugsiga Sare ee Roosevelt (RHS) min 1200 oo arday ilaa 1500 oo arday halka cadadka guud u noqonayo 1350/1700.

Macluumaad dheeri ah ee waxa ay ka dhigan yihiin tirooyinkaas waxaad ka eegi kartaa [Wargayska Project Director #2](#). Walow hadii dib u xusuusin loo kaco lagu soo koobi karo, qaabkan, 1350 waxa ay noqon doontaa tirada guud ee ardayda uu qaadi karo kolka la ebyo dhismihiisa. Qaybaha guud ee qiyaas ahaan waxa uu qaadi karaa 1700 arday. Waxaa sidoo kale iyadna lagu taliyey in Dugsiyada sare ee Grant iyo Franklin ay noqdaan kuwa yeesha awood xaga balaadhinta ah mustaqbalka. Tan la xidhiidha ku kordhinta fasalada mashruuca iyo bedka goobaha ciyaaraha, maktabada, iyo maqaayada.

Iyadoo oo qayb ka ah wadahadalkoodii ayaa gudiga la waydiiyey su'aalo la xidhiidha meelaynta imika ee "doorashada tayeynta" goobaha qorshaha mashruuca, iyo sida ay tani u caawin karto tiro badan oo arday ah oo la meeleeyo. Waxaa sidoo kale la tilmaamay "Tobiya shaqada" ama " Waxbarasadha Farsamada Gacanta (CTE)", Erayadaa ayaa lagu tilmaamay goob barasho oo loo qalabeeyey si kolka ardayda loogu diyaariyo fursado dhaqo oo ka baxsan manhajka waxbarashada dugsiga sare.

Wadahadalka ku jeeda tayeynta ikhtiyaaraadka ay tahay in uu bixiyo dugsiga sare ee Roosevelt waxa uu soconayaa tan iyo kulanka Kooxda Ka Talo Biixinta [Qaabaynta iyo Kulanka Qaabaynta #2](#). Wada hadalku waxa uu socon doonaa bilaha soo socda inagii oo ka gudbayna wejiga qaabaynta una gudbayna qaab-shaxanaynta. Xubnaha bulshada waxa aannu ku dhiirigelinaynaa in ay kaga qayb qaataan aragtidooda kulamada soo socoda ama in ay si toos ah [noola soo xidhiidhaan](#). Barnaamijyada imika lagu taliyey waxaa ka mid ah Science/Technology (STEM) shop, "Makers Laboratory," xarunta qorista/daabacaada, ama xirfada cunta karinta.

Todobaadka xiga, **Isniinta, November 18 saacada 6:00 p.m. goobta Qolka Gudiga ee BESC** ayaa uu gudiga dugsiyadu ugu codayn doonaa bedka la filayo ee RHS. Haddii ay danaynaayan xubnaha bulshada in ay qayb ka noqdaan wadahadalka ku jeeda bedka mustaqbalka ee Roosevelt, waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay ka soo qayb galaan. Waa aad isku qori kartaa adiga oo la xidhiidhaya Caren Huson ama u dir fariin waqti hore Gudiga Degmada.

Go'aanka ka soo baxa gudiga waxa lagu biidhinayaa qorshaha qaabaynta ee ay imika shaqadiisu ka socoto Dugsiga Sare ee Roosevelt, sidaa awgeed waxa aannu ila socon doonaa go'aanka si dhow. Gaadh ahaan bedka barnaamijka ayaa lagu qeexi doonaa qaab-shaxaneedka loogu soo bandhigi doono bulshada Kulanka **Talaadada, , November 19 saacada 5:30 p.m. kulankan oo ka dhici doonaa maqaayada Roosevelt.**

Kulankan, Xubanaha bulshadu waxa ay yeelan doonaan fursad ay ku eegaan habsami-socodka shaqada halka ay warcelintoodu muhim u tahay qorshaha. Cabitaan iyo cunto fudud ayaa jiri doona.

Waanu idiin kaga mahadnaqaynaa warcelinta iyo ka qayb qaadashada aydin in dhawaytaba aad ku barataarayseen bilihii la soo dhaafay, iyadoo oo aan idinka filayno kuwiinii hore iyo kuwa cusub oo adinka ah ka qayb qaadashada geedi socodka lagu hurumarinayo dugisga. Fadlan nala soo xidhiidh su'aal walba oo kugu dhalata adiga oo adeegsanaya rhsmod@pps.net.

Michelle R. M. Platter

Madaxa Barnaamijka – Dugsiga Sare ee Roosevelt "Go Riders!"